

Marka la is qaadsiyo COVID-19

(Exposed to COVID-19)

COVID-19 waa xanuun si fudud la isugu gudbin karo qof-ila-qof hab ah neefsasho iyo dhibco yaryar oo ah qoyaana. Haddii lagu qaadsiyo COVID-19, waad ku xanuunsan kartaa oo COVID-19 ayaad dadka kale u sii gudbin kartaa.

Raac waxyaabaha hoose marka lagu qaadsiyo, xataa haddii aad soo qaadatay tallaallada COVID-19 ee lagaa rabo:

- » **Isticmaal gafuurxir** marka aad dadka la joogto ee guriga iyo bannaanka ilaa 10 maalmood ka dib maallintii xanuunka lagu qaadsiyey.
- » **La soco calaamadaha** COVID-19 ilaa 10 maalmood marka lagu qaadsiyo.
- » **Iska soo baar** COVID-19 ugu yaraan 5 maalmood ka dib marka COVID-19 lagu qaadsiyo.



Su'aalo Iyo Jawaabo

- ?** **Ka warran dadka aan isticmaali karin gafuurxirka?**

Haddii ay jiraan dad aan xiran karin gafuurirka (sida ilmaha ka yar 2 jirka ama dadka naafada ah) siyaabo kale ayaa looga difaaci karaa (sida in la hagaajiyo dhumaha hawada) waa in loo isticmaalo si aan waxba la isugu faafin ilaa 10 maalmood.
- ?** **Ka warran haddii la iga helo COVID-19 ama calaamadahiisa?**

Dadka gooni ka noqo haddii aad isku aragto calaamadaha ama lagaa helo COVID-19. Raac talooyinka goonida loogu baxo oo ka eego: dhs.wi.gov/covid-19/diagnosed.htm.

Booqo www.dhs.wi.gov/close-contacts.htm oo ka eego faahfaahin.